50 - DHIRTA IYO GEELA

Fiqi Buraale: Jaallayaal, dhirtii aanu shalayto dhex galnay, aad iyo aad ayey u badan tahay dhirta soomaaliyeed wax la koobi karana maaha sidaas misna waxa ugu wacan lama qorin dhirta soomaalida sababtuna waxay ahayd afafkii aynu wax ku qoran jirnay afaf shisheeye ayey ahaayeen, manta oon afkeenii wax ku dhiganno waxaa loo baahan yahay dhirteenu waxay gasho iyo waxay guddaba in aynu ka sheekeysanno qofba wuxuu ka xusuusan yahay. Xagga dawaa'iga aynu ka bilownee geedkan la yiraahdo Gogobaha bal wuxuu galo iyo wuxuu gudo aynu ka sheekeysanno aynuna wax ka weydiinno marka ugu horreysa Aw Daahir Afqarshe.

Daahir Afqarshe: Fiqi Buraalow waad mahadsan tahay, geedkaa la yiraahdo Gogoboodka soomaalidu wey wada fahamtay oo waa dhirta ku noqotay caanka ee qof kasta maskaxda kaga jirto in uu wax tarayo, marka geedkaas waa kan xididkiisa la soo qodo, waa la burburiyaa, waa la kariyaa, sida shaahaa laysaga cabbaa dadka qaarna iyagoo xoogaa yar oo sokor ah ku daray yuu iska cabbaa oo aan shah kaleba ku darin, qaarna shah bay ku daraan xoogaa ah isagiina gaar bay u kariyaan, hadday doonaanna qaraar bay ku cabbaan oo markii ay bartaan, qaraarkiisa macaan buu u noqdaa sida raga kafeega aan sokor lagu darin ee qaraarkiisa isaga cabba oo sidaa u jecleysanaya oo kale ayey u cabbaan, qaar intey burburiyaan oo ay ku xiraan maro yar oo cad ayey haan caano ah gunta u dhigaan oo caano geel ka buuxiyaan oo ku dhanaaniyaan oo hadhow caanahaasoo karay nuugaan oo isku hunqaaciyaan oo laabta wixii ku jiray oo dhan uu soo qaataa. Geedkaas sidii loo cunayba waxaa la ogaaday in uu yahay dawo cadiima oo isagu laabta safeyneysa oo jirka ka shaqeyneysa oo wixii cudur ah ee jirka ku jiray oo dhan bedeleysa oo qofkii nooc kale uu soo baxayo markaa qofkii qof kale la talinayaa, ileyn waa geed aynu ogaanay dawadiisiiye waxay kula taliyaan "Maxaad u cabbi weyday Gogobood ama u karsan weyday". Waa dawo layku raacsan yahay, waa yahay, waxaad kalood ku garaneysaa geedkaas in uu dawo yahay qofkii isticmaalay wax soor ah oo deeqayaa ma jiraan, mar hadduuba abitaydkiiba kuu furayo in uu qofka caafimaadkiisa ka shaqeeyey saasaa lagu garanayaa.

Haddaba iyadoo sidaa loo macaamiloodo cilmi kalaa hadda la soo rogay caleentiisii yaa la bartay markaasaa la soo hoolinayaa marka uu caleemeysto dhul dhan ayaa laga buuxinayaa wey iska qallaleysaa, sida shaaha ayey iskugu marmarmeysaa markay qallasho oo shaahba laga garan mayo, kaasaaba ka sii xoog badan bay leeyihiin xididkii la qodan jiray oo iyana waa cilmi gadaalkakan la ogaaday. Geedkaasi wixii xabadka gala oo dhan inuu daweynayo oo halkaa laabta iyo qofkii duray ku dhaco iyo qofkii oofwareen ka bogsada iyo waxa xabadka uun baa loo cabbi jiraye waxa la ogaaday hadda markii cudaradii bataan, wixii gooriyaan ahaa iyo wixii kale jirka ku jiray ee dacarta kale jirka xumeyneysa oo dhan in uu wada nuugayoo dibadda dhigayo oo qofkii oo dabadeen is bedelay oo dhiigiisii isbedelay oo saafi garoobay ood

mooddo in uu ku maydhay saabuun cadar, dhiiggiina is bedelay yaad dabadeed arkeysaa. Geedkaa anigu intaa ayuun baan ka gaaray Fiqi Buraalow.

Fiqi Buraale: Waa tahay weli kaama harin Aw Daahir. Waxaa jira geed la yiraahdo Tiire, dadna wuxuu u yaqaanaa Xarmal, marka Xarmalkaa ama Tiirahaa waxaa u badan haweenka in ay isku daweeyaan. Intay laf xoolaad soo qaataan, qusuusan araxda ama lafahaa taxan ee geela ama dabada lo'da inta bulka hore la iska gooyo xubno-xubnahaa ay tahay ayaa lagu kariyaa. Waxaa kaloo jira bahasha la yiraahdo Hanjaleelada oo iyadana loo yaqaan "Sharbatal Nabi" oo iyadana noocya badan loo cabbo kuwaas madaax noogu dari lahayd Aw Daahirow!

Daahir Afqarshe: Mahadsanid, Xalmalkii ama Tiirihii aan marka hore ku noqdo, Tiirihii waa la karinayaa, jiliftiisii haddii ay qalalan tahay iyo haddii ay qoyan tahayba waa isku mid, shaahii baa lagu karinayaa kolkii lagu kariyo wasladdii jilifta lahayd  baa halkan layska dhigayaa goonideeda, way iska qallaleysaa, markii la doonaa haddana lagu celinayaa shaahii, sidaa waa leysugu daweeyaa oo wixii xabadka ku jira inuu cunayo waa la ogaaday. Rag kaa tumay oo ka dhigay daqiiq oo kale oo xoogaa yar oo shah ah ku darsanaya oo yiri xiiq iyo waxaasaan qabnaa oo ku walaaqayo oo guntii ay markaa fadhiisaneyso oo cabbaya oo yiri waa ku bogsadayna waaba arkay. Markaa geedkii horta macaamiladaa in uu leeyahay oo sidii loogu mucaamiloonayo kii hore ee aan soo sheegnay ee Gogoboodka ahaa isaguna wax cad weeyey waana dhirta ay soomaalidu isku raacsan tahay dawadiisa oo meel aan laga aqooni ma jirto labadiina waa la soo beec geeyaa oo manta magaaladaa laga helayaa oo meel walba waa ay yaalliin, Xarmalku haba ugu sii cajab badnaadee ama tiiraha qofba siduu u yaqaanno, kaasaaba beeca kaga sii horreeyey weligiidba magaalooyinkaa lagu kala iibsanayey oo uu yaallaa maanta, beec ahaan buu u yaaallaa. Marka halkaasaan kaga harayaa, inuu sidii geedkii kale aynu soo sheegnay wax u daweynayo waa wax cad.
Jaleeladii, salalmaki baynu u naqaannaa, sharbatal nabi baynu u naqaannaa, geed dhulka soomaalida mashuur ah weeye, waa geed waxaan aanu soo sheegnay ka wada horreeya, marka haddii Sharbatal Nabi la yiri oo la yiri Nabigii baa cabbi jiray, geedkaa dabadeed intii aanu soo sheegnay oo dhan wuu ka wada horreeyaa, siyaabaha loo cabbana anigu sidaan ku arkay waa sidatan: keedkii waa la kariyaa, marka la kariyo wax sokor qaraarka iskaga dara iyo wax sidiisa u cabbaba waa leeyahayoo waa lagu shubmaa, tii caynkaas ahayd waxaa la ogaaday in aynaan aqoon geedka sida loo kariyo wax la ogaaday in biyo yar oo aad u qiyaaseyso intii calooshaadu qaadi karto ee aad hadhow isaga ka cabbi lahayd, in aad kerli ku kariso ama digsi hadba kaad la dooneysay, sidii hilibkan madaxa la yiraahdo ee la shashabiyo ee maalin gelinkeed la kariyo intii in la' eg in la kariyo ayaa la ogaaday, biyihii aan lahaa waa la miisayey, waxaa la doonayey laba meelood inuu dabku cuno meelina soo hadho. Salamakikaasu waxay wax u

tareynin iyadoo cayriin uun baynu cabbi jirnay, ciladna dadka waa ku kici jirtay, dad badan oo calooshu qalalan tahay oo ba iman waayey oo u la'dayna waa la sheegay. Markaa salamakidii waxaa laysla ogaaday in biyihii aad ku karineysay uu cuno dabku laba oo loo kariyo sidii madaxa loo shashamin jiray oo kale, biyihii kuu soo haray in aad cabto, biyihii wuxuu u keenayaa markaa sidii ciladda kale u keeni jiray laakiin maxaa dheer oo karintan tirade badan lihi keentay, dawadan waa tii keeni jirtay caal markii ay qofkii ka marato wixii calooshiisa ku jiray ee uu sifoobo ayaa tii la kariyey oo rag cilmi leh laga soo gaaray waxay noqotay in ay soo dhacdo waxaan dabadaba soo mari kareynin oo qofkii isla yaabo oo uu yiraa waa maxay ibtaladani oo hadhowto bahashan cajaladuhu ku jirto oo kale oo aan ahayn caashii soo gogo'aysay oo uu la yaaban yahay, marqura dho' soo dhahayso. Waa wixii oo ay uruurisay marka ay karsantay ayeyna waxani ka shaqeysay markii horana cayriin baa lagu cabayey dabadeed waxaa lagu arkay cilmigaas oo rag kutubaha darsay oo aqoon u lahaa waagii hore sidii loogu macaamuli jiray oo kutubta ka keenay yaa sidan oo kale u kariyey, dabadeedna waxay yiraahdeen waxakan ay keentay ee qashin ah waxaa ka sii cajab badan qofka sidan u cabba sannad waa in calooshiisu joogsan, sababtu waa maxay? Caashatan soo dhacday ee calooshii safeysay aawadeed ayaa ilaa sannad dambe laga joogo calooshii waa meyran tahay, dabadeed cunnadii haysan meysee waa iska soo deyneysaa. Calool jileec baa imanaya, dhiiggii oo is bedelay yaa imanaya, qofkii oo si kale noqday oo dawoobay yaad arkeysaa. Cilmigaana waa la sheegay Salamakida oo sidaas in loo kariyo waa la helay.

Waayahay si kalena waa la sameeyey, waa la duqeeyey budaa laga dhigay, markaa malab lagu daray, waa laysku walaaqay, malqacad mugeed uun baad ka cuneysaa, markaasaa calooshii hadba wixii ku jiray dibedda u saareysaa, shuban weyn ma yeelaneyso, wixii cillad ahaana way dhameyneysaa, cilmigaana waa loo soo saaray Salamakidii, markaana si kale waa loo soo saaray, ragbaa waxay iyadii iyo geedkan la yiraahdo nakhwaha ee shaaha lagu daro, markaa salamakidii iyo nakhwihii, iyo xamaltii iyo sonkor iyo biyihii iyo iyadii markii laysku daray waa shan shey, markii laysu kariyey waxay noqdeen Kitikoole, Kookakoolahan la innaga iibiyo oo dhanaankii leh, oo macaankii leh, oo cilladii wax aanan soo kicineynin leh, oo salamakidii sideedii u leh waaba Kooke oo kale haddaad ruxdana xumbeynaya, sidaana waa loo cabbay oo wuxuu kaasina ka dawo yahay waanad ka caajiseynin, halkii aad yar nacaysay urteeda, wixiiba ma jiraanba, guduud madow isu rogay oo macaan oo dhanaan, ileen Xamartana waa sharbad labaad oo calooshii bay iyana mayreysaa, iyana waxay noqotay maqaam weyn oo Salamakidii laga gaaray. Anigu bal intaas yaan uga baxayaa idinkoo dhirta iga yaqaana, bal waan idiin soo wareejiyey.

Fiqi Buraale — Cabdi Dhegaweynow intaas maxaad ku dareysaa?

Dhegaweyne — Anigu kuwa aad sheegteen waa wax aanu soo dhaafnay oo ku

noqon mayo hadda, laakiin wixii kale yaan wax ka gaarayaa. Dhulkeena geed aan dawo ahayn waa ku yar yahay. Maalin dhaweyd xeradan aanu joogno wiil ayaa sanka dhiig ka yimid, aabihiis oo ku warwareegayo oo leh dhaqtarka, dhaqtarka yaan anigu xerada soo galayoo geed baan sanka u saaray, Ilaahay waa igu guuleeyoo tif dambe kama soo dhicin, agteyduu geedka ku yiiloon ka rujiyey, marka geedba wuxuu dawo u yahaan aqoon maahee dhirtu waa wada dawo. Ninkii waan tusayoo waxaan iri hadduu dhiigga ku soo noqdo sanka u saara, ileen anoon la joogin hadduu dhiiggii ka yimaado waa dhibaatee ma ogtahay, laba maalmood oo kale ayuu ka yimidoo sankaa loo saaray oo siduu buu noqday, marka dhirtu geed aan dawo ahayn dhulkeenu wuu ku yar yahay lakiin ma wada naqaan. Waxaan aqaan anigu kuwa indhaha lagu shubo, geedkan Suradka la yiraahdo xididkiisana waa laysku daweeyaa caleentiisana waa laysku daweeyaa. Caleentiisa waad tuujineysaa oo indhahaad ku shubeysaa, xididkiisana waad dubeysaa oo wixii nabaraad saareysaa. Dhir badanoo dawo ah yaan anigu aqaan, mana wada aqaanee dhirta dalkeena waa wada dawo ee waanan garaneyn. Qaar Mayraxdey dawo ku yihiin, waxaadba ka soo qaaddaa gumarta, haweenku carruurta qoortay ugu xiraan, nirgaha yaryar markay dhashaanna way u xiri jireen, weylaha way u xiri jireen, wuxuu ka dawo yahay waxakan la yiraa carruurtu waa hafrowdaa, isha iyo jinka iyo waxaana waa ka dawo, wixii la xoqayo cunaha dadka xanuuna mayraxdiisaas ayuu calaashadaa ama waa lagu xoqaa, dadka cunuhu xanuunoo fin iyo wax ka soo baxaan xagga gudaha qanjirrada. Waxaa jira mid Kali la yiraahdoo kaligii baxa oo xoolaha marka furuqu ka soo daato nirgaha iyo ariga iyo inta qurbo loo taxo Nugaashuu u badan yahoo ka baxaa, hawdkana waa leeyahay. Waxaa jira kuwa naagaha gurgurtada qaba iyo xoolaha mardheertu ka soo dhici weydo la cabsiinayoo ka soo tuuraya, khusuusan waxaa ka mid ah bisiqa asalkiisa waa la midoo ku hakan meyso, naagaha gurgurtada qabana geedka Qararada la yiraahdaa loo karinayaa. Markaa ma dhameyn karo laakiin intii maanka iiga jirta, waxaa ka mid ah Mareerka, geela markuu daaqi waayo laan Mareer ah baad goyneysaa ood afka kaga xoqeysaa, hashii daaqeedii bay qabsaneysaa. Waxaa ka mid ah Xodayga, geelu hadduu cadhoobo kaadidiisa iyo xabagta xodaygaa leysku karinayaa, geeleydoo dhan waa yaqaaniin, waa leysla karinayaa oo la qaboojinayaa iyadoo yar qandac ah markay rib noqoto, lagu arki mayo dhogor cad baa mareysa, waa xabagta xodayga. Geedka Qadowga waxaan aqaan cudur kaloo lagu daweeyo, ka soo baxa iyo waxaa oo geed iskii u baxa maaha, nin wax iiga sheegsheegayna wuxuu igu yiri isaga qudhiisaa ka soo bax ah oo geedka qudhiisa geed kaluu ka soo baxayaa siduu u joogo, wixii qoorta loogu xirana lagu arki mayo oo waa ka kacayaa. Shuruuduu ii sheegay oo aan is iri ka bixi meysid oo aan ka baqay, goyntiisa iyo siduu iigu sheegay yaan cilmi u lahaynoon ka baqay, laakiin wuxuu daweynayey waa ii sheegayoo geedka gebigiisba waa ka soo bax buu yiri, marka kasoo baxa saasuu dawo ugu yahay buu yiri, cilmiya badan ayuu iiga sheegay, dadka wax weyn oo uu u dhimo hadduun shuruudiisa ka soo

bixinna wuu ii sheegay. Waxaa ka mid ah Dhiigtiraha midkeynu oran jirnay, xididkiisaad calashaneysaa inaad taqaaniina waan u maleynayaaye wax calooshaada ku harayaa ma jiro. Marka idiin dhameyn kari mayo, dhir badanoo aan is iri waxbaad ku daweyn kartaa oo aan kula tacaalayna waa jirtaa, dhirta badideediina wax waan idiin sheegay waxna ma badin karo, waa kaa.

Fiqi Buraale Waa tahay, waad mahadsan tihiin. Waxaa kaloo jira laba geed, labadaa geed waxaan filaayaa, mid kama baxo geesta waqooyi iyo xaggaa bari, laakiin wuxuu u badan yahay xaggaa galbeedka, waa geed libaaxu cuno markuu itaal dareeyo, waxaana la yiraa Qurjeen. Waxaa kaloo isagana jira mid aanu wada naqaanno oo la yiraa Like, labadaba aad baan u aqaanaa oo waa dawo.

Haddaan idinka sheekeeyo geedkan la yiraahdo Qurjeenku wuxuu ka baxaa weligii meel kayn ah ama buur, waxaanu u badan yahay had iyo goor dhulka kaymaha ah. Libaaxu marka uu is yiraahdo waad itaal daran tahay yuu keynta gala, bahalkaa oo qoyan ayuu afka dhigaa macal iniinihiisii afartan habeen buu ku jiraa, afartankaa habeen markuu kayntaa ku jiro ayuu qaadayaa meel gebi ah ama ood weyn oo wuxuu tijaabinayaa boodadiisii, hadduu meeshaas taabto afartan habeen oo kale ayuu dib ugu noqonayaa. Markaas side baa loo cunaa oo la isugu daweeyaa? Dhowr nooc baa loo cunaa mar waxaa la soo qaataa iniinihiisa oo sidii filfisha oo kale weeyey weyna adag yihiin, habeenkii yaa biyo lagu baryiyaa markana subixii yaa mooyaha lagu garaacaa, markaa wuxuu u kala baxayaa iniin iyo budo, budada fasaleetiyaan ku guntaneysaa iniintana gooniyaad u dhiganeysaa, hilib ama caanaad soo qaadaneysaa waad ku shubeysaa markaasaad ku karineysaa, markaas hadduu hilib yahayna maraqiina waad cabbeysaa hilibkiina waad cuneysaa, hadduu caano yahayna caanihii waad cabbeysaa, markaas salkuu fadhiisanayaa budadiisii budadaasna waad qaadaneysaa. Hadduu budadii yahayna fasaleetaad ku xiraneysaa oo shaahaad cabbeysaad kalba in yar ku darsaneysaa ama caanaha aad cabbeyso yaad ku darsaneysaa oo sidii biyo ahaan u cabbeysaa. Calooshaada wixii ku jirayna wey soconayaan xubnahaadaas oo dhanna waxay noqonayaan bir, raggu hadduu xagga haweenka ka caajiso xitaa bahalkaasaa la siiyaa.

Likahakan aad aragteen waa isaga soo baxa marka dooggu uu da’o, dabadeedna afka waa isaga ka kala jeexma, markaad soo rujiso bari hoosuu leehayay oo sida xuukada aad mooddo, taas waa la iska cunaa macna ma leh, laakiin inta cas yaa la engejiyaa markaasaa mashiin la marshaa, waxay noqoneysaa budo sidaas u jilicsan, taasaad shaahii ku darsaneysaa, iyadana haweenka haddii laga caajiso sidaasaa loo cunaa. Likuhu meel walba waa ka baxaa weliba dhulkeenuu u badan yahay, laakiin Qurjeenku wuxuu u badan yahay xaggan galbeedka. Kaas haddeynu intaas ku dhaafno, dhirta soomaaliyeed aad iyo aad bay u fara badan tahay dawadeedu, haddaynu bilmatal ka soo qadanno Mayraxda, noocyo badan bay leedahay, midi waa macaan markaad calaashaneyso oo hah ma leh, midina markaas calaashaneyso carrabkaa kugu soo gogo’a, bil metel markaynu quraca soo qaadno waa saddex jaad,

laba hah ma leh oo hahdoodu waa yar tahay, ka Damalka ah ee aad u ragaa iyo Duruutaha midna hah ma leh, hahdoodu waa yar tahay, labaduba waa gaboobeen. Midka dimcadka ah ee cusubee markaa soo baxay ee laamaha wanwanaagsani ka baxaan markaad calaashato markiiba waad ku haahooneysaa, haddii afku ku buko ama cirridku ku buko taasaa la calaashanaayaa, haddii kale eed calaashan weydo waa la kariyaa, markii mayraxdaa la kariyo biyahaasaad cabbeysaa, iyadaad ku luqluqaneysaa sidii dawadii waa quraca mayraxdiisa. Waxaa idiin yimid Mareerka, sidaa uu u dhigay Dhegaweyne anigoo u aqaana ayaan misne nooc kale u aqaanaa, carruurta ama qof hadday jadeeco ku dhacdo, inta la soo qaado caleentiisa ama mayraxdiisa yaa la kariyaa inta xoogaa la jugajugeeyo markaasey biyihii dhiin guduudan noqonayaan, dhiinkaa guduudan yaa loogu qubeynayaa qofkii jadeeca qaba, laba maalmood haddaad mariso waa khalaas. Haddaba dhirtu way fara badan tahayayoo oo ma aynu gaari karno say u dhan yihiin, hase ahaatee waxay soomaalidu tiraahdaa dhirta qaarkeed qaarna waxay u wanaagsan yihiin laboodka qaarna dheddigoodka, bil matel labadii Daahir ka sheekeynayee Xarmalka iyo Tiiraha, labadaasi waxay u wanaagsan yihiin haweenka oo haddii ay naaguhu dhalmada ka raagto ama araxdu axanuunto bahalka lagu daweeyaa waa xarmalka iyo tiirahaas, marna shah ahaan bay ku karsadaan, marna lafahaasey ku karsadaan, noocay u cabbaanba waa wax u wanaagsan haweenka, xitaa kuwa caadadu kuraagto way karsadaan oo dawo ugu yahay. Tan kale Salamakida hadday u noqonno, intaa uu Aw Daahir sheegay anigoon wax ku dareynin, waxaa raacda Aw Daahirna waa yaqaanaa oo waa la iska calaashadaa gebigeedba ama ha engegnaato ama ha qoyanaatee markaasaa biyahaagaas iyo waxaagaas iska cabbeysaa, kaama keento dacar fara badan laakiin calooshey kuu furtaa oo laasatiif bay noqoneysaa oo wax caloosha jilciya oo hadba xoogaa kaa keena ayey noqoneysaa.

Haddba haddaynu dhirtaa intaa ku dhaafno, aynu u noqono xaggii dhirtii kale oon is leenahay daawo ayey noqon karaayaan. Bil metel markaynu xagga xabagta u leexano nooc kastaba ha ahaatee, waad aragteenoo xabagtu way kala duduwan tahay, noocyo fara badan baa jira oo dhulkeenaa laga qaadaa, Bil matal Beeyada waa toban nooc yaa loo sameeyaa, tobankaas nooc ee dibedda loo qaado, mid waliba nooc gooni ah ayey tartaa, hase yeeshee dawaa laysu daweeyo Maydiga mooyee oo sida hadiga yaa biyaha loogu cabbaa oo sidii hadiga ayaa loo kariyaa, waa kow quracu waa laba, midu waa midda miidda leh oo guduudan midina waa ta maaleeyada ah. Maaleeyadu waa sun, haddii la kariyo oo la dhigo oo laba maalin aad joogto naftaaba kaa boodeysa oo waa sun, Khadna waa laga sameeyaa inta kiimiko lagu daro, waa quraca maaleeyada la yiraahdo.

Waxaa jirta dhir fara badan, bal anigoo intaa ku soo gabagabeynaya aan yara u nasanno oon wax xusuusanno, Aw Daahir oo gacanta taagayana waan u jeedaa ee bal wuxuu ku dari karana aanu eegno.

Daahir Afqarshe — Fiqi Buraalow waad mahadsan tahay, waxba ku kordhin maayo inta aad sheegtay. Laba shey oo aad ka soo warrantay yaan kugu xoojinayaa ee waxba ku kordhin mayo. Geedkan la yiraahdo Likaha ee marka aan arladeena joognay intuu meel cidla ah ka soo baxo dilaaci jiraye saddex dhambal noqon jiraye af guduudan muuqan jiray baa waxaa isku daweeya dabagaalaha yaa xuukada hoose cuna oo hareeraha intuu ka qodqodo taa hoosuu doonayaa Maalabuq na way yiraahdaan, kan hoose ee macaan. Markaan ciyaalka ahaan jirnay een maalaabuqdaa soo saarno naasa yaryar buu hoos ku leeyahay, geedkaas inuu manaafacaad leeyahay markii hore maba ogeynba ilaa aan Banaadir imi, markaan imi ayaa waxaa layga soo baxay halkaa naaska dushiisa ah, kolkaasaa la yiri “war ninkan diisi u raadiya”, anigu diisi waxaan u iqiinay likigan, likuhuna inuu wax daweeyo maanan ogeyn oo carruurnimaan isaga cuni jirnay baridiisa hoose, geedkii baan raadiyey mise waa la iga iibiyey, kolkaasaan arkay in uu Like yahay qallalan, kolkaasaa la yiri magacan waxaa la yiraahdaa Diisi oo xaggan dhoobeyda ah yuu xoog uga baxaa, waxay leeyihiin wixii fin ah oo dhan, Jadeeco ha ahaato, Furuq ha ahaado, ka soo bax ka sii weyn ha ahaato, isagii baa fin ah finkaasaa lagu daweynayaa, inyar oo ciddida la eg haddii lagu rido kirligii oo la kariyo wuxuu noqonayaa guduud tiq ah oo aad yaabeyso, falaas baa lagu shubayaa oo qofkii waa iska cabbayaa, waan isku daweeyey markaa. Nabarkii hadduu dilaaco intii dawo kale loo dooni lahaa asoo tuman ayaa la saarayaa oo anigaa isku daweeyey mar uu nabar iga soo baxay oo waaya arag baan u ahay.

Geedkii kale ee Qurjeelka ee aad sheegtay, waa la isku raacsan yahay inuu dawo caalami ah yahay, dabadeedna dowladeennaaba beertay, Jawhar iyo Balcad iyo dhulkanuu ka beeran yahay. Waxaan ku ogaaday bandhiggii la keeni jiray carwada isagoo ku jira masaf oo ay leeyihiin waa beereen qolooyinka beeraha yaanba arkayba, suuqana wuu yaallaa aniguna waan soo iibsadaa, geedku waa geed laysu daweeyaa aanu ka horeyn, in libaaxa isu daweeyana waa la ogaaday markay kaneeco cunti ee uu bukoodo inuu doolo oo qabto dhulka uu ka baxo oo geedkaa cuno waa la isku wada raacsan yahay oo soomaalidu waa wada og tahay. Haddii hadda masar yar aad ku ridato oo sidii raggii buuriga cuni jiray aad fiif iska siisato duraygii dibba u arki maysid, geedkii geed cajab qaba inuu yahay saasaad ku garaneysaa. Labadaa geed ayaan rabay macnayaasha aan ka arkay in aan kuu kordhiyo, labadana kii diinsiga waxba kama hayee waa soo iibsadaa oo wuxuu yaallaa dukaamada carabta oo dhan oo geed kinsi ah weeye oo geed aad dhagrato oo kaa maqanaan kara maaha. Bal anigu intaa ayaan kuugu kordhiyey, iminkana Dhegaweynaan u dhiibayaa isagaa innnaga dambeeyey miyi e.

Dhegaweyne — Horta anigu laba oday oo geed walba isku daweeya lama ekeyn karo laakiin saan u aqaannaan idiin sheegayaa, geedka likaha aha ee aad leedihiin waa dawo, likihii oo dhan maaha kan dawada ah, mid waagii hore aan riyaha ku maali jirnay oo xididba ma leh oo waa soo fuqayaa, mid baa meel ka baxaya, meeshuu dhan buu

qabsanayaa oo xididadiisii ayaa dhan walba u kacaya waa kii Daahir Afqarshe sheegayey, isku sina uma baxaan kaa mulugsan maahee gun balaaran buu leeyahay Kamaayuluq baa la yiraa, likihii caadi ahaa maaha, waa like waana ka duwan tahay, sal balaaran bay leedahay, isuma eka likuhuna waa dhiin oo sida uu diisigu u eg yahay ayuu u madow yahay furuurucna waa leedahay, likahana waa roob la bax salka markaad ka rujisana xidid ma leh oo meeshii raadba ku reebi mayo, midanse markii arlada oo dhan laga guro xididadii baa sii baxaya Kamaayuluq baa la yiraa meel meel ayey isaga taal, ninkii yaqaanay xididkuu sii raacaa markaasuu sal weyn ugu tagayaa, markaan cilmigaa sii raacayna diisigii waa Kamaayuluqdaa ee likihii caadiga ahaa maaha. Mar waa curdun marna waa gahayr sidii mirihii marna way bisishahay, markay bisishahay waa malab oo kale oo iskamaba qabaneysid. Intaasaan idinku kordhiyey oon ka gaaray.

Fiqi Buraale — Waa tahay, maxaad Carmada ka taqaaniin? Bahasha Carmada la yiraa waa tan miraha leh, laba xaaladoodba waan u arkay; waa mare marka jiilaalada xuni ay dhacaan ee abaari ay dhacdo ee wax la qasho la waayo ee bariid la karsado la waayo waa la karsadaa waana la cunaa markaa iyadoo miro iyo caleenba leh, waxaan kaloon ku arkay dadka markay calooshu xiranto, inta la tumo yaa la kariyaa, marba biyaheedaasaa la shubtaa, calooshaadu marna joogsan mayso, bahal hadduu ku jirayna kaw ayey ka siineysaa, dacari hadday ku jirtayna dibeday u soo tuureysaa, haddey bislaatana miraheeda waa lays ka muud muudsadaa, caleenteeda iyo mirihii inta burburiyo oo dhari lagu shubo yaa la karinayaa markaasaa qofba koob iska darsanayaa, markaas caloosha wixii kuugu jiray dibaday u soo baxayaan, dawadaasna waxaa u badan oo sidaa u sameeya koonfur. Carmada intaasaan ka arkaye maxaad ku kordhin lahaydeen idinku?

Daahir Afqarshe — Carmada waan kuu kordhineynaa, adigu aabahaa baad u garatay xoolo bandanna wuu idiinka tegey. Waagaan Daraawiish ka nimid een baaba’nay ee dadku caydha ahaa ee aan ladnaanta lagu wada jirin baan garanayaa, carmada marku naqu da’o dad dhan baa ku noolaan jiray, waa la Karin jiray, carmaduna laba nooc weeyoo midi waa carma maroodiga iska waaweyn ee dhagta weyn leh oo taasu micno ma leh, midina waa tii yaryareyd ee dhirta fuushaneyd ee dhulkeena ka bixi jirtay, taasi marka ay tahay naqa ee ay cusub tahay miradeeda iyo iyada nafteeda labadaba waa la Karin jiray, iyada oo iska dhanaanna waa la cuni jiray, iyadoo caano riyaad lagu daray oo dhanaanka ka jibiso oo la cunana waan arki jiray, gaajo beel iyo dawo labadaba waa loo cuni jiray. Intaasaan kaaga kordhiyey.

Fiqi Buraale — Waad mahadsan tahay Aw Daahir, bal aan u yara nasanno.
Bal waxaynu u leexaneynaa innagoo qeyba badan ka dhigeyna dhirta Qaraabka, Qaraabku waa fara badan yahaye miraha marka ay curdanka yihiin ee roob intuu helo ay soo baxaan marka uu dhamaado ubuxu oo miruhu markaa soo kudaan, waxna ay dhulka

ka soo fuuraan oo sidooda u soo baxaan yeynu galeynaa. Haddaba waxaynu ugu horeysiineynaa geedka la yiraahdo Uneexo, innaga oo geedka ruuxiisa tilmaan ka bixineyna, miruhuna sey u baxaan aan tilmaan ka bixineyno, bal Aw Daahir aan u dhiibno.

Daahir Afqarshe — Mahadsanid, Fiqi Buraalow geedkaa la yiraahdo Unaaxada, dadka aan inala aqoon marka aan u tilmaameyno waa geed dhulka intuu ka baxo aan dheeraanin lagana yaabo in uu geed kale dacalka saaro oo caleemaha ay geed kale raacaan oo aan ahayn dusha sare ee Dureemada iyo wax la mid ah inuu dacalka saaro yaa u caada ah, geed dheer oo jirrid lehna ma aha, caleemo balbalaaranna waa leeyahay, isaga iyo mirihiisana lama kala garto, waa la baaraa caleemahaa sidaa looga qaadaa mirihii oo laadlaada la helaa kolkaasaad baasha kale ka galeysaa oo saa u rogeysaa, mar hadduu soo baxo mirihiisana curdan waa lagu cunaa isaga oo gahayrayna waa la cunaa isaga oo bislaadayna waa la cunaa intaba, Waxa kaloo u dheer mirihiisa geela hasha tebisay, xididkiisaa la bixiyaa waa la diiraa hashaa dabada laga geliyaa xagga ay ilmaha ka qaadato, haddii hal goolowday tahay oo baarqab wax badan amaahiyeenoo ilma qabsan weyday waxaa ka imanaya wax caloosheeda ku raagay ilmasidaha iyo waxaa dabadeed markiiba waa ilma qabsaneysaa oo geela marna waa la xaaraa marna geedkaasoo kalaa la geliyaa dabadeed way kaala shaqeyneysaa waa dhaqtarnimo, waxaad ka ilaalineysaa in laba saddex casha ah baarqabka inta ay bogsaneyso, waana wax aan jarrabay anigu oon cilmi u leeyahay oo isoo maray. Dad sanbooray oo dhaqtar soo gaari waayey oo tumay xididkii oo biyo ku riday oo biyahaa dabadeed sanka ku shubay oo hindhisho ku waashoo xab miiran sanka ka soo daayey oo sidaa ku bogsadeyna waa ay jiraa, kolkaana wuxuu doonayaa dhaqtarro macnihii dadka u dhaadhiciya oo cilmiyan ku darso waa geedkaa labada dhanba faa'iido ku leh xididkii iyo miriiba waana geed gaaban oo geed kale in uu qabsado maahane hadduu keligii meel ka baxo dhulkuu wada jiifaa oo geed sare ka eegi meysid. Anigu bal geedkaasaad i weydiiseen intaasaan ka gaaray.

Fiqi Buraale — Waa tahay, bal aniguna intaas waxaan kuugu daraayaa Uneexadii marka aad cunto ooy curdin soo dhaafto oo ay gahayr noqoto ama bisishahay hah bay reebtaa, miraheeduna iniinyo yaryar ayey leeyihiin sidaad u tilmaameysay, intaas uun baan kuugu kordhiyey.
Bal iminkana waxaan u gudbi doonaa miraha kale ee ku baxa roobka, kaasoo aanu ka soo qaadeyno Dabayoodka. Bal Dhegaweynow adigaa xaggii reeraha iyo dhulkii ku dambeeyee bal dabayoodkaas noo micnee.

Dhegaweyne — Dabayoodku waa geed mira yar yar oo kuuskuusan ayuu bixiyaa oo waa la kariyaa ee cayriinka laguma cuno, wuu macaan yahay marka la kariyo oo wuu fiican yahay, hadduu engegana miro la karsadana ma leh xoolana ma daaqaan, markii wax la habaarayana waxaa la oran jiray “Naga tag Dabayood engegey noqo e”. Wiil Shaacir ah oo reer gabar u soo saari waayey ayaa ku heesoo

wuxuu yiri “Reeryahow dad iyo duunyaba Dabayood engegey noqo” inta uu wax tar leeyahay waa intuu qoyan yahay, marka Dabayoodku wax tarkiisa intaa weeye. Waxaa jira geedo kaloo curdanka lagu cuno oo dabayoodkaa ka dhigan, waa Maroorada oo waa Faramugga oo dhirtaasey isku maraan. Waxaa jira geed Cillan la yiraahda oo bari weyn lahoo haddaad oonto aad qodoneysood ku harraad baxayso, waxaa jirta Doonbir, waxaa jira mid galinka horana dhanaan galinka dambana aan dhanaaneyn, Maroor ayaa la yiraahdaa, waxaa jira Askax, waxaa jira kan qorxanta leh ee la yiraa Xamako oo wuu dagaagaa ninkaan aqoonna qodaxdaasuu kaga baqaa, ninka yaqaan qodaxdaa wuu iska eegayaa oo siduu u yaqaan buu u cunayaa, mid Gacayre la yiraa ayaa jira isna oo la cuno oo curdan ah, marka dhulka doogga ka soo baxo dhir badanoo curdanka lagu cuno ayaa jirta, hadda ma wada tiring karo laakiin wax badan ayaa la cunaa oo lagu noolaadaa, marka ay engegaan oo ay noqdaan gahayrna aan la cuneyn. Yicibta curdanka waa lagu cunaa waana geed abaareed oo jiilaalkii waa lagu baxsanayaa oo la guranayaa, geed miroodka oo dhan Ciidka Hohobka Gomoska curdanka waa lagu cunaa, marka dambana waa kuu engegeyaanoo jiilaalkii waad cuneysaa, Daraygaa ka mid ah oo Bardahaa ka mid ah iyaga curdan laguma cuno oo waxaa lagu cunaa bisaylka oo waa geed abaareed, Heerigaa ka mid ah curdanka iyo gahayrka xoolahaa ku cuna markay bislaadaanna waxaa cuna dadka, anigoo yar ayaan habaabay, meel Wadh la yiraa ayaan ku habaabay, subixii waan qaday subixii dambana waan qaday, galabtii anigoo sakaraad ah yaan wartii u soo baxay Jigladii oo bislaatay oo sidaa u lalmada ayaan markii qorraxdii iga qabowday qabsaday, sida caanahaan uga dhergay habeenkii anigoo dibbiro u go’ayaan seexday, aroortii markii waagu ii baryeyna waan qabsaday oo sidii caanahaan uga dhargay, gabbalku markuu ii dhacayna waan ka dhergay, habeenkaana waan maqnaa, lix caana maal ayaan cunayey, tabteydii anoo ah ayaa galabtii dambe la i helay oo laba nin oo meesha socota baa Ilaahay igu soo saaray. Markaa Higladu caynkaa weeye biyo uun baad u baahan tahay, dhirta qaar waxtarkeedu sidaasuu siyaado u yahay, higladaasu waxay dheertahay haddaan cunto ama biyo ku cabto ama caano ku dhanto wax allaale wax calooshaada ku harayaa ma jiraan, raga meesha ay ka baxdo joogi jiray raga fardaha la orda oo ayna gaari jirin ayey ahaayeen waxaasuna waa iyada. Marka bal Fiqi Buraalana aan u dhiibo.

Fiqi Buraale

Waa tahay, horta dhirta sidaa aad u sheegteen marka doogga ay tahay la cuno waxaa weeye wax xoolo jiratadu ay iska cunto oo qaraabka doogga la soo baxa ayey ka mid yihiin, bil metel Geesariyoodka waa la mid, hase ahaatee dhirtaa badideed oo qaraabka ku soo baxa waxaa isagana jira geedka la yiraahdo Boqoshaaga, ruuxiisu waa laba nooc, mid waxaa la yiraahdaa Ciddi-weylood oo waa ka macaanoo fiican, ka kale boqoshaaga ahee waaweyn isaga sidaa looma jeclaba. Haddaba dhirtaa yaryar oo qaraabkaas ihi kulligeed inta hore qabowgu jiro sida Jinowga, Cali-boodena dad i yaqaano ayaa aroorta hore badiba la cunaa,

wixii aan biyo laga dooneynin, wixii biyo laga doonayaana waa fara badan yihiinoo waxaa ka mid ah Cooddiga oo Doonbirtaa ka mid ah oo waxaa ka mid ah Butada iyo Maroorada oo iyadu bari ayey leedahayoo waa kala bari weyn tahay, midina waa bari yar tahay gooni uma joogsatee waxay had iyo good isku martaa Dureemada ama Duurka.
Haddaynu kaas ka gudubno, hase ahaatee dhirta kale ee raandhiiska ah innagoo aanan u geudbeyn Darayga iyo Bardaha iyo Garasta iyo Yicibta, bal xagga Hohobta iyo Murcanyada iyo Gomoshaaga iyo Tukalalmista iyo  dhirtaas la dhigto sida loo cuno ama dhirta ruuxeeda tilmaanteeda bal Aw Daahir aan u gudbiyo Dotoor Siciid ha ii dambeeyee.

Daahir Afqarshe

Mahadsanid, waxaan in yar dib ugu noqonayaa dhirta aanu soo sheegsheegnay, cilmigeedii waanu sheegnay laakiin geed walba wuxuu naga rabaa in aanu tilmaan ka bixino oo uu ogaado qofka aan aqoonin. Matalan Maroorada waa geed yar oo xididi yar oo dhuuban ayey la raacdaa ama Dureemada ama Duurka ubax yarna way bixisaa, caleemana ma leh oo xididkaa yar inta ay curdunka tahay gelinka horana waa dhanaan gelinka dambana waa kharaar. Ragga dhirta aad uga shaqeeyana waxay leeyihiin xooluhu way iska daaqayaane sida ay u kala dhanaan yihiin ayaa geeduhuna u kala tayo badan yihiin ayey leeyihiin.
Geedkan la yiraahdo Faraxuunshada, geed hoostiisuu ka baxaa sida qaalibka ah, laama yaryar oo dhuubanna waa leeyahay, geedna ma ahee waa wax yar oo iska soo baxaya naqa uun hadhowna iska qallalaya, marka aad u timaaddo inta uu dhanaan yahay ee uu curdanka yahay waa macaan kan qallalay ee gahayrka ahna waad iska dhaafeysaa, geednimo looma tilmaamo oo geed kale hoostiis uun buu ka baxaa. Geed Xamakow la yiraahdo oo dhulka ciidda ah ka baxa oo geed hoostiisuu isna ku ballaadhaa, isagu ma wada dhintee xoogaa jirrid baa ka sii joogta marka ay abaartii tahay mar allaale markuu roobku taabtana furuuc ayuu bixinayaa oo geed hoostii ku ballaaranayaa, qodxa yaryar buu leeyahay oo laga tiro dabadeedna sidii kuwii hore loo sheegayey yaa loo cunaa Mid kale ayaa jira oo la yiraahdo Carrab-lo’aad oo waslad keliya ah oo dhuuban oo sidaa u baxa aadna aan u dheereyn oo dhirta dhexdeeda ayuu ka baxaa khaasatan geed cawsaadka ayuu ku dhaw yahayoo la ehel yahay oo saas uun baa loo soo rujinayaa waa dhanaan saddexdaa farood ayuuna la dhumuc eg yahay marka laysku qabto farahaa xididdo yaryarna dhulkuu ku haystaa isna waa dhirtaa soo baxaysa doogga abaartiina la waayaya. Waxaas oo dhan waa dhirta aan abaarta moogaalka lahayn ee doogga ku soo baxa, waxaana laga yaabaa badi ahaan inaanba caleen lahayn. Kuwaa waxaa igu celiyey in aan tilmaamo cilmigoodana idinkaa sheegay, bal waa idinku soo celinayaaye hadba waxaad garataan inoo qaada oo aan ka baaraan degno, geedkii aan tilmaameynane laftigiisa horta aan sheegno si dadka aan dhirta aqoonina uu u barto oo aanu ugu tilmaamno.

Fiqi Buraale Waad mahadsan tahay. Intaas waxay ahayd qaraabkii ku soo baxayey doogga ee la socday marka geedaha kalena ay soo baxaan Duxida iyo Ramaaska iyo Maxaansugaaga iyo Gargarada iyo markay soo baxaan la socda weeye.
Intaas haddaynu halkaa ku dhaafno bal aan u gudubno dhirta la yaqaan ee qaraabka leh ee marna curdin lagu cuno marna gahayr lagu cuno marna ururcadde lagu cuno marna toon ahaan iyo bislaad lana dhigto, taas aynu ka soo qaadano Hohobta toonna waa la yiraahdaa mirihiisa hohobna waa la yiraahdaa geedka, marka geedkaa isaga ah dotoor Siciid bal xoogaa ha inoo balbalaariyo.

Saciid Waa mahadsan tahay. Sidaad u sheegteen dhirta cunto ahaan loo isticmaalo way badan yihiin, haddii la yiraahdo waa la tirinayaana in qeybqeyb loo qaato mooyee mar lama wada tirin karo. Hohobtu waa geed aan qodax lahayn, laanlaan buu u baxaa si wada jir ahna wuu u baxaa, caleemo yaryarna waa leeyahay. Laba noocba cuntadeeda waa loo cunaa, mid waa marka mirihiisu yihiin curcurada waa la cunaa dhadhan weyn ma leh markaa laakiin waa macaan, markay gahayraan oo adkaadaanna, badi dadku saas uma jecla, markay bislaadaan dhigaal way galaan, qofkaan dhiganeyna markaas wuu iska cunaa, Hobob badan intuu soo xaabsado ayuu xuubka yare e qalalan ka daadshaa sida gumashaaga, tilmaan ahaan haddaan soo qaadanno sida looska toxobkiisa oo kale ayuu leeyahay kaasaa laga hurgufaa markaasna toos loo cunaa marka biseylka uu yahay. hab kale waa loo cunaayoo intii weel lagu shubto ayaa caano lagu shubaa oo caanaha ayaa lagu cunaa oo hadba habkii la rabo ayaa loo cunaa, mirihiisuna miraha macaan ayey ku jiraan wuxuuna leeyahay lafa yar yar oo ama laba ama saddex oo afar oo saas isugu lammaan, hoostana waxaa ka sii xiga oo u dhaxeeya lafta iyo qolofta cadkaa yare e macaan, lafihiisu maaha wax waaweyn oo ninkii raba sidiisuu iskaga liqi karaa, waa geed haddii la hagaajiyo cuntada ku wanaagsan waxtarna wuu leeyahay, daawo ma aha ee waa cunto oo waa dhirta loo cuno nafaqada. Waad mahadsan tihiin.

Fiqi Buraale Haddii aan intaas ku sii daro uu Dotoor Saciid uu ka bixiyey hohobta, waxay leedahay nafac fara badan, haddaad caano weydada subag baa lagu cunaa inta Fandhaal loo qaato, habka loo cunaayo haddii la burburiyo iniinahaa labada ama saddexda ama afarta ee isku dheggen haddaad burburiso oo aanad caano geel oo wanaagsan aanad haysan calooshuu dadka kaga dhegaa. Wuxuu kaluu leeyahay soomaalidu aad ayey u jeceshahay oo way u arahdaa oo in xashimo iyo jawaano laqaato ayaa awr loo kaxaystaa oo loo safraaba, dabadeedna guryahaa la dhigtaa, waxaaba la geeyaa magaalooyinka oo lagu iibshaa, waa la daasadeeyaa koombo ahaa ayaa loo iibiyaa, sidaa uu sheegay dotoor Saciidna jirrid ma laha laamaheeduna wey firirsan yihiin badiba ama ha dheeraadeen ama ha gaabnaadeene, waxay qiima saa'id ah u leeyihiin marka laamahaa la soo guro oo la dubo oo diirka laga qaado haweenku Janjal bay ka dhigtaan, janjalkaasna badi waxaa

lagu sameeyaa qumbaha iyo ubbooyinkayaa lagu janjaliyaa, qorigaa isaga ahna xarku ma galo, waa qori dhuudhuuban haweenkuna saababka ayey ka dhigtaan. Geedkan dhulka oo idil kama wada baxo, wuxuu ku badan yahay dhulka hawdka ah ee dhirtu ku fara badan tahay oo ciidda guduudan, badiba dooxooyinka kuma badna.
Intaa haddii aan ka baxo, Dhafaruurta ama tukalalmista ama murcanyada bal Aw Daahirow inoo taataabo.

Daahir Afqarshe

Mahadsanid, sida aad sheegatay dhirtan hadda waxaan mareynaa tii la oran jiray geed miroodka, intaas waa isku abtirsiinoo geed mirood baa la isku yiraahdaa, sida ay u baxaanna sida aad tilmaantay weeyoo jirrid ma lahee halkii ay ka soo unkameen ee ay dhulka ku haystaan yaa laan waliba gaarkeed u baxdaa dabadeedna qaarna waa kala firdhaa qaarna dushuu iska soo doontaayoo cutub isku noqdaa dusha iska haysta, sida ay u baxaan horta waa sidaas. Dhirtaa waxaa ka mid ah geedka la yiraahdo marka Toonka laga soo tago Dhafaruur, isagu waa ka ula dhaadheeryahay siduu u baxayeyna waa sidan oo kale, mirihiisuna waxay yeeshaan subag da’a oo miid ah marka uu si wanaagsan u baxo, waa ka lafa adagyahay kii toonka marka la calalinayo qofkii ilka adagna waa jejibiyaa, qofkii aan ilka adkeyna sida waayeelka iyo carruurta way mud-muudsadaan markaasay cajilkiisa iska tufaan, geedkaas waa laga goostaa saabkii uu sheegay Fiqi Buraale, guryaha carshaanta laga sameeyeyna waa lagu dhistaa oo ulo dhaadheer oo aan xar galeynin oo aanu cuneynin aboorka, dhirtiiba waxaa col u noqday guryihii laga dhisayey, waxaana saas loo leeyahay laamahoodaa waxay leeyihiin raandhiis oo waxaanay lahayn dhuux, geedkii kale ee dhuux lihi ushiisii waqti yar bay joogeysaa, taasaa dabadeed dhirtii manaafacaadka badnayd cawirtay. Geedkan la yiraahdo Mircanyada, iyadaa dhowr nooc noqota oo miraheeduna kala jaad noqdaan, geedka soo bixidiisuna noqdaa kala jaad, kan ciidka la yiraahdaana markaa ugu sii miro wanaagsan, isna geedkiisa teelteel buu u baxaa sida aan horay u soo sheegnay mirihiisuna waa dhiin guduudan oo aan u ekeyn sidii kuwii hore oo sidaasaa iyagana loo cunaa raasamaalna way noqdaan oo taa miraheedu dhimanayaan maaha sidii toonka oo kale aye muddo badan qaadanayaan oo ama waa la safrin karaa ama reerkii lihi wuu iska haysan karayaa muddo in uu cuno. Sidaan idiin sheegayna afar nooc waan hubaa ayey u kala baxdaa; Mircanyo xaadeedka bannaanyada ka baxda ee xoogaa yar faafta taasaa ugu sii liidata, wixii meel dhagax ah ama hawd ah ka baxaana waaba ka sii sarreeyaan faa’iido weyn bayna leedahay magaca guudna waxaa la isku yiraahdaa Mircanyo, intaasina waa isku qoys kala baxbaxay.
Mid kale Gomoshaa baa la yiraahdaayoo wuxuu u eg yahay Toolkuu mirihiise raacaan, laakiin waa ka waaweyn yahay, laamihiisuna waa firirsan yihiin manaafacaad weyna ma leh oo geel jiraha iyo ruuxuu gaajeysa uun baa meelahaa ka googoosta maahine sidii kuwii kaleen soo sheegnay ee dhirta mirahoodu raasamaalka leeyihiin ma aha oo maba miro badna, ulihiisuna waa

la goosan karaa, ulana waa laga dhigtaa geela lagu kaxeeyo kuwa guryaha lagu dhisayo ama saababka laga dhigto.
Inta geed miroodka ah ee miraheedu bislaadaan ee isku waqtiga ah ee ku wada baxa roobka isagoo cudin ahna la cuno marka uu bislaadana sidan noqonaya ee isku qoyska ah anigoo intii kale aan u tegin anigu intaa yaan ka yar taabanayaa, bal waan idiin soo celinayaaye ninkii reer hawdka ahaaye waxaasoo dhan kala dhaliyey iyo kuwa la micnaha ah Dhegaweyne haddaan u dhiibayaaye, bal adiguna Dhegaweynow bal geedka barashadiisa in la innaga helo laftigiisa oo dadku sidaada oo kale weligii uma guraneyninoo oo duurka uma joogine carruur yaryar oo hadda duudka ku jirta iyo kuwa yaryar ee aan weli hadalka aqoonin weeye waxaan aan qabaneynaa oo waa raasimaal dambe, adigoo halkaa inooga wadi doona bal waan ku dhegeysaneynaa.

Dhegaweyne Anigu dhir badan baan ku soo nacfiyey, hawdkana waan ugu jiray. Waxaan idiin sheegayaa saddex geed oo dhirtaan hawdka ku joogno ka mid ah oo haddii aanay saddexdaa ahayn si lagu joogaa ay adag tahay. Geed biyaanu ka dhiganaayoo waxaa la yiraahdaa Yooco oo xididkeedaanu qodonnaa oo waan ku oon baxnaa, geedna Goosey baa la yiraahdaayoo mirihiisaanu cunnaa marna Muqurro waaweyn oo haamo laga dhaanshuu xitaa leeyahayoo jiilaalka moqorkiisaanu cabnaa, geedna waxaa la yiraa Himiro oo haddey bislaato miro loo dhigo maba jirto waxay isku dhadhen yihiin canabka sidiisoo kaleyna u baxdaa.
Marka waan idiin kala macneynayaaye geedka Himirta la yiraa doogguu la soo baxaa curdankana laguma cuni karo, sida malabka weeyoo markaad cabbaar qurquriso wadnahay ku qabanayaanoo waad ka joogsaneysaa, wax la macaan ahna lama arko, sannad sand baanu leeyahoo xoog u bislaadaa, dhulkaa hawdka sare ayuu ka baxaa fandhaaladana waa laga qortaa.
Miro kuus-kuusanna wuu leeyahay, waxaa laga qortaa qabaallada oo dhakalladaa laga qortaa oo aad buu u waaweyn yahay caleen waaweyna wuu leeyahay, abaar abaar ka tagtay yuu caleenta tuuraa, laakiin abaarta waa ka dhacdaa. Nacfigiisa biyahaasaa ugu sii badan, mirihiisa waa la gurayaa oo la warayaa oo timirta Barnida ah ee guduudan yuu u eg yahay oo cadna waa leeyahay lafna waa leeyahay, cadkaasaan disii timirtii ka xagxaganeysaa, markaas ka xagato laba qori ama laba dhagax yaad isa soo ag dhigeysaa, tii cadkii aad ka xagatay iyo lafihii tuurimeyside weel yar baad ku rideysaa, markii cadkii la leysto laftiiyaa la jebinayaa, dhuux yaroo kuusan yaa laga soo tuusayaayoo kaasaa la cunayaa, waa kii ninkii yiri “ waxa naga dhalaalaya waa Goosay dhuuxii iyo Himir dhacaankii”. Marka geedka Goosay la yiraa dhowrkaa nacfi yuu leeyahay, moqor baa mar laga cabbaa, mar waa geed weynoo la harsado, mar qabaalada iyo weelkaa laga qortaa, bahalkan qaansada lagu rito laan isaga ah bay goynayaan labada madax bay ka jarayaan dhuuxana way ka bixinayaan oo waa laga dhigtaa iyana.